



## **CAAWIMAADA SHAQO LA'AANTA KA DHALATAY SAFMARKA (PUA)**

Waxaa la kordhiyay u qalmida gunnooyinka magdhawga shaqo la'aanta ee shaqaalaha aan u qalmayn magdhawga caadiga ah ee shaqo la'aanta.

### **S`uaal: Yaa helaaya caawimaada PUA?**

- Shaqaalaha ay ka dhamaatay u qalmida gunnooyinka Magdhawga Shaqo la'aanta ee Caadiga ah (UC) kadib Luuliyo 19, 2019
- Shaqaalaha iskood u shaqaysta, dadka oonleenka ku shaqeeya, qandaraaslayaasha madaxa banaan, shaqaalaha gig, iyo/ama dadka gudbiya caymiska foomka 1099
- Shaqaalaha lumiyay ama shaqeeya saacadaha shaqada oo intii hore kayar ee shaqada nusgelinka ah
- Shaqaalaha aan haysan taariikh shaqo oo ku filan ama mushahar si ay ugu qalmaan gunnooyinka caadiga ah ee UC

### **Su'aal. YAAN helayn caawimaada PUA?**

- Shaqaalaha oonleenka ku shaqayn kara ee mushaarka qaata  
(ilaa inay shaqeeyaan maahee saacado kayar intay shaqayn jireen kahor COVID-19, taasoo hadday jirto ay u qalmi karaa Caawimaada Shaqo la'aanta Masiibadu keentay)
- Shaqaalaha ku jira fasaxa shaqada ilaa inay gunnooyin ku qaataan maahee sabab la xariirta inay shaqeeyaan muddo kayar sidii caadada u ahayd

### **S`uaal: Meeqa asbuuc ayuu qofku qaadan karaa gunnooyinka PUA?**

Jawaab: Gunnooyinka waxaa la wadayaa 39 todobaad.

### **S`uaal: Haddii PUA la ii ogolaado, meeqa gunnooyinka PUA ah ayaan heli doonaa?**

Jawaab: Tirada gunnadu wuxuu la mid yahay tirada gunnooyinka caadiga ah ee shaqo la'aanta, cadadka ugu yar ee gunnada PUA waa \$189.00. Haddii kalana, waa 50% celceliska mushaharkaaga todobaadkii.

### **S`uaal: Waxaan maqlay in la bixinaayo \$600. Anna sidoo kale ma heli doonaa lacagtaas?**

Jawaab: Laga bilaabo asbuuca ku dhammaada Abriil 4, 2020, ilaa Luuliyo 25, 2020, haddii aad u qalanto gunnooyinka PUA, waxaad sidoo kale heli doontaa lacag dheeraad ah oo dhan \$600.00 todobaad kasta ood ka helayso Barnaamijka Magdhawga Shaqo La'aanta ka Dhalatay Safmarka ee Federaalku baqxsho (FPUC).

## **S`uaal: Sidee ayaan uga codsanayaa gunnooyinka PUA gobalka Ohio?**

Jawaab: Oonleen ahaan uga codso barta <https://pua.unemployment.ohio.gov>. Haddi aad qabto su'aalo, wac 1-833-604-0774.

## **S`uaal: Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay si aan u codsado PUA?**

Jawaab: Magaca, ciwaanka, nambarka taleefanka, ciwaanka iimeelka oo sax ah, nambarka social Security, taariikhda dhalashada, ruqsada darawalnimada ama nambarka aqoonsiga gobalka, iyo taariikhda shaqooyinka aad qabatay sanadaha 2019 iyo 2020; Sababta aad shaqo la'aan u tahay; Xogta dadka aad masruufto (lamaanahaaga ama carruurta) iyo nambarkiisa social security iyo taariikhdiisa dhalashada; Xogtaada baanka ee lacagta toos laguugu shubaayo (ama waxaad dooran kartaa in gunnooyinka laguugu shubo kaarkaaga baanka); iyo canshuur celinta 2019 haddii ay jirto.

Haddii aad tahay qof iskiis u shaqaysta, waa inaad keentaa cadayn macquul ah uu muujinaysa shaqadaada, oo ay ku jirto laakiin aan ku koobnayn, foomamka W-2, risiidyada iyo kaararkii ugu danbeeyay ee mushaharka, cadaymaha lacagta kusoo gashay (oo muujinaysa faa'iidada iyo khasaaraha), ama diiwaannadii ugu danbeeyay ee baanka oo muujinaayay lacag shubida tooska ah ee mushaarka.

## **S`uaal: Qasab miyaa inaan soo gudbiyo codsiyo todobaadle ah si aan u helo gunnooyinka PUA?**

Jawaab: Haa, waa qasab inaad codsi soo dirsato todobaad kasta ood shaqo la'aan ahayd sabab la xariirta COVID-19.

## **S`uaal: Waa maxay Taariikhaha hadda u dagan barnaamijka PUA?**

Jawaab: Janaayo 27, 2020-Diseembar 31, 2020

## **Si aad u hesho Tilmaamaha Codsiga PUA oo Qodob-Qodob ah ka fiiri:**

<https://jfs.ohio.gov/ouio/pdf/PUA-StepByStepApplicationInstructions.pdf>

Macluumaadkan waxay dhaqan galaysaa lagasoo bilaabo 06/19/2020.

## **Wax su'aalo ah ma qabtaa?**

Adeegyada Sharciga ee Koonfur-Bari Ohio 833.288.2936 (Koonfur-Bari Ohio)

Haayada Legal Aid Society ee gobalka Columbus 614.241.2001 (Bartamaha Ohio)

Xafiiska Marion 740.383.2161 or 888.301.2411 (Degmooyinka Delaware, Marion, Morrow, iyo Union)

Mid kasta oo kamid ah barnaamijyadeenu wuxuu siiyaa adeegyada sharciga oo bilaash ah dadka reer Ohio ee danyarta ah iyo dadka waayeelka ah.

*LASC/SEOLS cidna kuma takoorto sabab run ah ama mid la mala awaalay oo la xariirta isirka, midabka, diinta, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga ama dareenka, xaalada guurka, wadanka qofku ka yimid, naafada, da'da, asalka, ama inuu qofku kamid ahaa ciidanka milatariga marka la qoraayo, la daawaynaayo, ama uu ka qaybgalaayo barnaamijyadeena, adeegyadeena iyo shaqooyinkeena, ama hawlaheena shaqalaaysiinta iyo shaqada.*

